

FARRIIN OGEYSIINAH

KU: Guddiga Dugsiga
KA: Andrea Zayas, Hoggaamiyaha Sarkaalka Tacliinta
OG: Brenda Cassellius, Kormeere Guud
Mary Dillman, Madaxa Shaqaalaha
Megan Costello, Lataliye Sare
TAARIIKH: Maarso 17, 2021
CODSI: Barashada Xagaaga ee 2021

Magaalada Boston iyo Boston Public Schools waxay ujeedadoodu tahay inay hubiyaan in arday kasta uu leeyahay qorshe xagaaga. Caawa waxaan bixin doonnaa aragti guud oo ku saabsan dadaalada Barashada Xagaaga ee 2021, oo ay ku jiraan faahfaahinta barnaamijyada xagaaga ee hadda socda, qorshaheena ah inaan siino fursado shaqsiyeed, iyo xogta diiwaangelinta taariikhiga ah. Waxaan dib u eegi doonnaa Caruurnimadeena Hore, Waxbarashada Gaarka ah, Bartayaasha Ingiriisiga, Soo Celinta amaahda, iyo barnaamijyada xagaaga ee dugsiga kusalaysan. Sidoo kale, waxaan soo bandhigi doonnaa faahfaahin ku saabsan shaqada aan la wadaagno wada-hawlgalayaasha bulshada iyada oo loo marayo Akadeemiyada Barashada Xagaaga 5 aad, Xerooyinka kobcinta, barnaamijka Baro iyo Waxbarshada ee Boston, Golaha Warshadaha Gaarka loo leeyahay iyo fursado shaqo oo dhallinyaro oo dheeri ah oo magaalada oo dhan ah. Marka la isku daro, waxaan hadda haysannaa 27,781 fursadood oo xagaaga ah oo ay heli karaan ardaydeena, oo ku dhow 5,000 fursado xagaaga ah oo ka badan intii aan helnay xagaagii 2019, ka hor inta aan la helin faafa. Intii lagu gudajiray barashada xagaaga fog ee 2020, 44% ardayda dhigata waxay ahaayeen arday naafo ah, 40% waxay ahaayeen Bartayaasha Ingiriiska, 38% waxaa loo aqoonsaday madow, halka 44% loo aqoonsaday Latinx. Magaalada Boston waxay ku maalgelin doontaa in ka badan \$16.5M ardaydeena fursadaha xagaaga ee 2021.

Isdiiwaangelinta barashada xagaaga ee BPS waxay furantahay bartamaha Abriil. Faahfaahinta barnaamijyada shaqsiyadeed ee aan ka bixinno magaalada oo dhan ayaa laga heli karaa [halkan](#).